Af-Soomaali (Somali)

# SAMEE QORSHE

GET READY .govt.nz

## Maxaa qorshahan loogu talo galay?

### Xubin Qoyska ah

| | |
|---|---|
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |

### Miyaad haysaa qof leh baahiyo gaar ah?

Miyuu qof ku jira qoyskaagu u baahan yahay caawimada in dibada degdeg looga saaro guriga, ama marka uu guriga ku xanibmo muddada xaalada gurmadka? Miyuu qofna ku tiirsan yahay socodka ama qalabka caafimaadka ama qalab kale oo gaar ah? Miyuu qofna ku tiirsan yahay dawo qorid? Miyay haystaan saadka gaadhaya saddex maalmood ama wax ka badan ama beddelkooda haddii nalka aan la heli karin?

## Ma jiraan dhallaan ama carruur da' yar?

Miyaad haysataa wax xafaayado ah, caanaha carruurta, iwm, oo gaadhi kara saddex maalmood ama ka badan haddii dukaanadu iyo jidadku ay xidhan yihiin? Miyay alaab kuugu jirtaa kiishka degdega loo dhufsado xaalada aad u baahato inaad degdeg u tagto siiba?

---

## Wax xawayaanka rabaayada ah?

Xawayaankaagu waa masuuliyadaada, markaas hubso inaad ku darto iyaga qorshayntaada degdega ah. Miyaad haysataa wax cunto iyo biyo ah oo gaadhaya saddex maalmood ama wax ka badan? Miyaad haysataa qafisyo ama wax lagu qaado si loogu qaado iyaga oo badbaado loogu hayo? Miyaad haysaa qof soo qaada oo xanaaneeya xawayaankaaga haddii aanad guriga gaadhi karin?

GET READY .govt.nz

### Qof kee kasta oo kale ayaa caawimo u baahan kara?

Ma jiraan wax saaxiibo ah, qoys ama jaarka oo u baahan kara caawimadaada in loo gurmado xaga guriga ama si dibada loogu saaro?

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca: | | Faahfaahinta Xidhiidhka: | |
| Magaca: | | Faahfaahinta Xidhiidhka: | |
| Magaca: | | Faahfaahinta Xidhiidhka: | |

## Xidhiidhada faa'iidada leh

Had iyo jeer garaac 111 gurmadka. Ka feker wax ku saabsan khadka tooska ah ee gurmadka gollaha degmadda, xarunta caafimaad/dhakhtarka, mulkiilaha guriga, shirkada caymiska, shirkada korontada, daryeelka maalinta/dugsiga, shaqada iyo xubnaha qoyska.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca: | Adeegyada Gurmadka | Faahfaahinta Xidhiidhka: | 111 |
| Magaca: | | Faahfaahinta Xidhiidhka: | |
| Magaca: | | Faahfaahinta Xidhiidhka: | |

# Haddii aanu guriga gaadhi wayno

## Meeshayada kullanka

Halkeed kula kulmaysaa haddii aydaan wada xidhiidhi karin oo aad kala maqan tihiin marka gurmadku dhaco? Sideed halkaas ku tegi lahayd?

Ku dar cinwaanka iyo tilmaamaha

---

## Kumaa soo qaadi doonaa carruurtaada?

Haddii aad awoodo inaad carruurta ka soo qaado dugsiga, daryeelka maalinta, daryeelka dugsiga ka dambeeya, iwm, kuwaa samayn doona? Ma taqaanaa? Miyaad dugsiga/daryeelka maalintu hayaan faahfaahintooda?

| | |
|---|---|
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |
| Magaca: | Faahfaahinta Xidhiidhka: |

## Haddii aanaan is qabsan karin

Kumaa kuu soo eegaya (qof ka maqan magaalad xaalada telefoonka gudahu ay go'een)?

Magaca: Faahfaahinta Xidhiidhka:

Magaca: Faahfaahinta Xidhiidhka:

Magaca: Faahfaahinta Xidhiidhka:

## Waxaan ka heli doonaa wararka u dambeeya

Sideed ku heli doontaa wararka/digniinaha u dambeeya? Idaacaddee ayaad dhegaysan doontaa? Websaydkee iyo boggagee saxaafada bulshadda ah ayaad eegi doonaa?

Idaacada/websaydka/kanaalka saxaafada bulshadda:

Idaacada/websaydka/kanaalka saxaafada bulshadda:

Idaacada/websaydka/kanaalka saxaafada bulshadda:

## Haddii aanu guriga ku xanibmano

### Miyaanu haysanaa saadka gurmadka

Cunto iyo cabbitaan ilaa saddex maalmood ama ka badan (oo qof kasta ah ay ku jiraan carruurta iyo xawayaanka rabaayada ah)? Toojka, raadyaha, iyo baytariyada labbadaba?

Gargaarka degdega ag/saadka caafimaadka? Dhammaan uma baahna inay ku jiraan hal sanduuq oo wayn, laakiin waxaad ka heli kartaa mugdiga.

Samee qoraalo faahfaahsan halka alaabtan la dhigay

---

### Miyaanu ognahay sida loo xidho biyaha, loo demiyo korontada iyo gaasta?

Keliya kuwan demi haddii aa dka shakido liigid ama laynka oo waxyeelo gaadhay ama haddii ay sidaas ku faraan masuuliyiintu inaad samayso. Haddii aad gaasta demiso, waxaad u baahan doonaa xirfad yaqaan inuu dib ugu shido.

Faahfaahinta sida loo xidho biyaha, loo demiyo korontada iyo gaastaa

GET READY .govt.nz

## Haddii aanaan koronto haysan

**Maxaad samayn doontaa haddii aanay jirin koronto?**

Sideed wax u karin doontaa, u diiranaan doonta, wax u arki doontaa habeenka (ha isticmaalin shamaca maadaama ay yihiin halista dabka)? Miyaad haysataa lacag cadaan ah xaalada ATM yadu ay shaqayn waayaan? Miyaad haysataa shidaal kugu filan xaalada bamka batroolku aanay shaqaynayn?

Qoraal ka samee waxa ay qoyskaagu u baahan yihiin inay qabtaan

---

## Haddii aanan haysan biyo

**Maxaad u baahan doontaa inaad samayso haddii aanay jirin biyo?**

Miyaad haysaa biyo kugu filan oo kaydsan (saddex litir qofkiiba maalintii ilaa saddex maalmood ama ka badan)? Miyaad biyo u haysaa xawayaankaaga rabaayada ah? Maxaad wax ku karin doontaa ama ku nadiifin doontaa? Maxaad u isticmaali doonaa musqusha?

Qoraal ka samee waxa ay qoyskaagu u baahan yihiin inay qabtaan

## Haddii aan degdeg u baxno

### Miyaanu haysanaa kiishka la dhufsado?

Miyuu qof kastaa haystaa kiishka la dhufsado* xaalada aad u baahan tahay inaad meesha ka baxdo? Xaga guriga, shaqada, gudaha baabuurka?

* Kiish yar oo leh dhar diiran, toosh, raadyow, agabka gargaarka degdega ah, cuntadda fudud iyo biyo.

Samee qoraalo faahfaahsan halka baaga la dhufsado la dhigay

---

### Halkee ayaan tegi doonaa?

### Halkeed tagi doontaa xaalada meesha laga saaro?

Sideed halkaas ku tegi lahayd? Haddii aad ku nooshahay meel xeebta u dhow, hubi inay ka durugsan tahay dhammaan aagaga ka daad guraynta sunaamiga. Halkeed joogi doontaa haddii aanad ku noqon karin gurigii?

Samee qoraal faahfaahsan halka aad tegi doonto iyo sida aad halkaa ku gaadhi doonto